

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
FAAFINTA RASMIGA AH		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	الْجُمْهُورِيَّةُ لْجُمْهُورِيَّةُ صَوْمَالِيْلَانْد	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA E-mail: Garyaqaankaquud@gmail.com		
Sanadka: 3aad	Cadadka: 10aad ee October	Taariikh: 01/11/2014
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.		

TUSMADA CADADKA

<p><u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:</p> <p>1) SOOMA BIXIN</p> <p><u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:</p> <p>2) Magacaabid , <u>XEER MADAXWEYNE Lr:</u> 0410/102014</p>	<p>252</p> <p>254</p>
--	-----------------------

QAYBTA SADEXAAD: DIGREETOYINKA,**WAREEGTOOYINKA, AMARADA & XEER****NIDAAMIYAYAASHA****WASIIRADA, IWM**

3) SOOMA BIXIN

QAYBTA AFRAAD: AMARADA &**GO'AANADA MAAMUL**

- | | | |
|-----|--|------------|
| 4) | Fulin Xoogan;
Maxkamada Gobolka Hargeysa | 260 |
| 5) | Amar Xayiraad Guri iyo Dhul
laba Baloodh ah;
Maxkamada Degmada Hargaysa | 262 |
| 6) | Amar Xayiraad Guri
Maxkamadda Gobolka Hargeysa | 264 |
| 7) | Amar Xayiraad Dhul
Maxkamadda Gobolka M/J
Hargeysa | 267 |
| 8) | Naado Xaraash Dhul
Maxkamadda Gobolka Hargeysa | 268 |
| 9) | Naado Xaraash Guri. Maxkamada
Gobolka Hargeisa | 270 |
| 10) | Diiwaan Gelin TV,
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 271 |
| 11) | Diiwaan Gelin Shirkada Masno-Star
Construction and Contracting,
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 272 |
| 12) | Caddeyn Diiwaan Gelin Shirkada
Sareedo Cosmetics and Cruset Hair
Color LTD
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 274
275 |
| 13) | Diiwaan Gelin Shirkada International | |

<p>Center company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u></p>	<p>277</p>
<p>14) Diiwaan Gelin Shirkada Malac Waters ComapnyPrtrolia Star Som Company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u></p>	<p>278</p>
<p>15) Diiwaan Gelin Shirkada Mijir General Trading Company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u></p>	<p>279</p>
<p>16) Diiwaan Gelin Shirkada Tisqaad Construction and Contracting Company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u></p>	
<p>17) Caddeyn Diiwaan Gelin Shirkada Ducaale Construction and Contracting Company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u></p>	
<p><u>QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA</u></p>	
<p>18) SOOMA BIXIN</p>	

REPUBLIC OF SOMALILAND



THE PRESIDENT



JSL/M/XERM/249-2822/102014

XEER MADAXWEYNE Lr:0410/102014

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee
Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee
Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay
Gudoomiyeyaasha
Gobolladu u leeyihiin
dhismaha Qaranka;

Markuu Garwaaqsaday: In baahi loo qabo buuxinta
xilka Gudoomiyaha Gobolka
Buuhoodle;

Markuu La Tashaday: Madaxda ay hawshani
khusayso;

Markuu ku qancay: In uu hanan karo xilkan;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Cismaan Ciise Maxamed, laga bilaabo taariikhda manta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Buuhoodle ee Jamhuuriyadda Somaliland.



Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA AFRAAD:
AMARADA & GO'AANADA MAAMUL



JAMHUURUYADDA



SOMAALILAND

MAXKAMADA GOBOLKA HARGAYSA

02/September/2014

MGT/DFL/2014

Ku: Taliyaha Saldhiga Booliska A/dhagax =Hargeysa=

Og: Taliyaha Qaybta Galbeedka Hargaysa =Hargeysa=

Og: Wasiirka Wasaarada Arimaha Gudaha =Hargeysa=

Og: Jaaraa'idada Ka Soo Baxa Caasamida =Hargeysa=

Og: Idaacada Raadio Hargeysa =Hargeysa=

Og: Loo fuliye: - 1. Yuusuf Muuse Kabadhe.

&

Og: Lagu fuliyeyaal: - 1. Faarax Xasan Guuleed

2. Geedi Jaamac Xirsi

Ujeedo:- Fulin Xoogan.

Maxkammada Gobolka M/jeex –Hargeysa-

Markay Aragtay: Galka Dacwada Fulinta ah ee
Sumadiisu tahay
MGH/DF/192/2014. Ee ka dhexeeya
dhinacyadda sare ku xusan.

Markay Aragtay: Xukunka Maxkamadda Gobolka M/jeex -Hargeysa- ee sumadiisu tahay MGH/DDL/167/2004, kuna taariikhaysan 02/02/2007. Nuxurkiisuna ahaa in ay Maxkamaddu u xukuntay dhulka ninka la yidhaahdo Yuusuf Muuse Kabadhe. Halka ay Geedi Jaamac Xirsina u aqoonsatay danbiile oo ay ku xukuntay lix bilood oo xadhig ciqaabeeda.

Markay Aragtay: Xukunka ka soo baxay Maxkamadda Rafcaanka Gobolka M/jeex, ee sumadiisu tahay MRGMJ/QMRL/66/2012, kuna taariikhaysan 05/04/2013, ujeedadiisuna tahay in ay Maxkamadda Rafcaanka Gobolka M/jeex - Hargeysa- ayiday xukunka Maxkamadda Rafcaanka Gobolka - hargeysa- ee sumadiisu tahay MGH/DDL/167/2004, kuna taariikhaysan 02/09/2007. Iyo in la diiday asbaabta rafcaan ee rafcaanlaha Geedi Jaamac Xirsi, iyo dood afeedkiisaba, waxaana la ogolaaday jawaabta rafcaansanaha Yuusuf Muuse Kabadhe Iyo dood afeedkiisaba.

Markay Aragtay: Xukunka ka soo baxay Maxkamadda Sare ee sumadiisu tahay MS/68/2013, kuna taariikhaysan 08/02/2013, ujeedadiisuna tahay in la diiday asbaabta rafcaanka

rafaanlaha ee ku taariikhaysan 30/05/2014 iyo in la ogolaaday jawaab celinta asbaabta rafcaansanaha ee ku taariikhaysan 14/03/2013, sidoo kalena la ayiday xukunka Maxkamadda Rafcaanka Gobolka M/jeex - Hargeysa-, sumadiisu tahay MGH/DDL/167/2004, kuna taariikhaysan 02/09/2007, gaar ahaan xubintiisa 2aad oo lagu bayaamiyey halka balook ee Yuusuf Muuuse Kabadhhe loo xukumay waana sidan:-

- ❖ Waqooyi waa waddada sandaqada Cabdi Cawil ku dhextaal ee Naasir waqooyi kaga soo jeedo.
- ❖ Koonfur waddad bari iyo galbeed u kala socota ee waqooyi ka maraysa fooqa Idiris Ankar.

Markay Aragtay: Qodobada 383,343 XHM.

Dhamaan asbaabtaas sare ku xusan oo dhan awgeed iyo Qodobada Sharci. Maxkamaddu waxaa ay soo saartay fulintan xoogan.

FULINTII XOOGANAYD

1. Maxkammada Gobolka M/jeex – Hargeysa- waxaa ay faraysaa Taliyaha Qaybta Galbeedka Booliska ee Hargeysa in aad xoog kaga fuliso lagu fuliyayaasha 1. Faarax Xasan Guuleed. 2. Geedi Jaamac Xirsi. Dhulka cabirkiisu yahay 48x90-mt, ee ku yaala

degmadda A/dhagax Area Warshadii Caanaha.
Jihooyinkiisuna kala yihiin:



Galbeed: Waddo
Bari: Waddo
Waqooyii: Waddo
Koonfur: Waddo

2. Waxaa kale oo lahu amrayaa Taliyaha Qaybta Galbeedka Boolkiska Hargeysa in aad ku wareejiso gacantana ka saarto dhulkaas loo fuliyaha Yuusuf Muuse Kabadhe.
3. Waxaa kel oo lagu amrayaa taliyaha in uu sharciga horkeeno cida alaala cidii ka hortimaada amarka fulinta xoogan.
4. Fulintan waxaa Maxkamadda goob joog uga ahaanaya kaaliyaha fulinta ee Mxkamadda Gobolka M/jeex – Hargaysa- Abshir Rabiile Subagle.
5. Fulintani waxaa ay soo baxday manta oo ay bishu tahay 02/09/2014.

Sidaas iyo wada shaqayn wacan

Alla Mahad Leh
[[Asad Nuur Cilmi]]
Garsooraha Maxkamada Gobolka M/JEEX
=Hargaysa=

*By: C/kariin Ismaaciil C/laahi
Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka M/jeex
=Hargeysa=*

JAMHUURIYADA



SOMALILAND



MAXKAMADDA DEGMADA HARGAYSA

MDH/DML/1263/2014

01/10/2014

Ku: Idaacadda Radio Hargeysa

Ku: Dhamaan Warbaahinta Madaxa Banaan

Ku: Maayirka Caasimadda Hargeysa

Ku: Agaasimaha Waaxda Dhulka ee Dawlada Hoose

Ku: Taliyaha Saldhiga Dhexe Ee Hargeysa

Ku: Taliyaha Saldhiga IB/Kood Buur Ee Hargeysa

Ku: Maayirka Ku Xigeenka Caasimadda Hargeysa

Ku: Xog hayaha Dawladda Hoose Hargeysa

Ku: Xafiiska Nootayooyinka Hargeysa

Ku: Garyaqaanaka Guud Ee Qaranka J.S.L

**UJ: Amar Xayiraad Guri iyo Dhul Laba Baloodh
ah**

Maxkamada Degmada Hargeysa

Marka Aragta:- Arjiga Codsiga ah Ee ay
Maxkamadda u soo qortay
Qareenka Dacwoode yaasha kala
ah Deeqa Aadan Dhamac iyo

Amiira Aadan kuna Codsanaayso
in loo Xayiro Guriga Dhulkan
Dhaxalka ah Ee ka dhaxaya ilma
Aadan Dhamac oo ku yaala
Degmada 26juun iyo Labada
Baloodh oo ku yaala Ibraahim
Kood Buur

Jihooyinka Guri shubka ahi waa

Bari.....Waddo

Galbeed.....Dhisme

Koonfur.....Waddo

Waqooyi.....Waddo

Gurigaasi oo ku yaala Degmada 26juun Gaar ahaan
Fooqa Ina afdiile agtiisa iyo Labada Baloodh Ee ku
yaala Ibraahim Koodbuur

Maxkamadu Waxay u Cuskatay Xayiraadan Qod:
294 295. 296 XHM.

Asbaabta Sare ku xusan iyo qodobada sharci Ee
sare ku xusan Darteed waxay Maxkamadu laga
bilaabo manta 1/10/2014 Xayiraad Saartay Dhulka
dhaxalka ah ku yaala Degamadda 26juun oo ku
yaalo fooq Shubka ah iyo Labada Baloodh ee ku
yaala Ib/kood buur Ee ay lee yihiin Ilma Aadan
Dhamac (Ee jihooyinkooduna sare ku xusan yihiin
in aan la iibin Karin la rahmi Karin la kirayn Karin
la dhisi Karin sifo kalena loo badali Ilaa amar danbe
maxkamadda ka soo baxayo

ALLA MAHAD LEH

C/raxmaan Maxamed Mowliid

Gudoomiyaha Maxkamada Degmada Hargeysa



Kaaliye: - khadra xasan Nuux

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

MAXKAMADDA GOBOLKA M/JEEX HARGAYSA

MGH

MGH/DML/34/014

2/October/2014

Ku: Dacwoode: Mahdi Ibraahim Xuseen =Hargeisa=

Wakiil ka yahay C/Qaadir Ibraahim Xuseen =Hargeisa=

Qareen u yahay Sh'Faarax Nuur Maxamed =Hargeisa=

Ku: Dacweysane: Hodan Cabdi Jaamac =Hargies=

Ku: Taliyaha Saldhiga IB/Koodbuur =Hargies=

Ku: Idaacada Radio Hargeisa =Hargies=

Ku: Wargeysyada Madaxa Banan =Hargies=

Og: Gudoomiyaha Degmada IB/Koodbuur =Hargies=

Og: Gudoomiyaha Maxkamada Rafcaanka Gobolka
Hargeisa =Hargies=

Og: Gudoomiyaha Maxkamada Gobolka Hargeisa
=Hargiesa=

Og: Gudoomiyaha Maxkamada Gobolka Hargeisa
=Hargiesa=

Og: Xafiiska Garyaqaanka Guud Ee Qaranka JSL
=Hargiesa=



Ujeedo: Amar Xayiraad Guri

Maxkamada Gobolka M/jeex:

Markay Aragtay: Gal dacwadeedka Madaniga ah ee sumadiisu iyo dhinac yadiisuba sare ku xusan yihiin

Markay Aragtay: Arjiga uu soo gudbiyay Maxkamada Qareenka dacwooduhu ee u jeedadiisu tahay codsi xayiraada guri oo ku yaala dagmada IB/Koodbuur xaafada sheedaha xabaalaha. Kuna taariikhaysan 31/03/014

Markay Aragtay: Qodobada 293,294,295 XHM

Dhamaan asbaabtaas sare ku xusan awgeed waxaa ay Maxkamaddu soo saartay xayiraadan

Amar Xayiraad Maxkamadeed.

Maxkamadda Gobolka M/jeex –Hargaysa- waxaa ay xayirtay guriga ku yaala Hargeysa degmada IB/Koodbuur xaafada Sheedaha Xabaalaha ka xigta Galbeedka Jihooyinkiisuna kala yihiin:-

Waqooyi.....Wado

Bari.....Wado

Koonfur.....Dhisme

Gal BeedDhisme

Maxkamadu waxay amaraysaa Haayadaha amniga ee ay sida tooska ah ugu socoto in gurigaas xayiranyahay cidii jibisana Maxkamada hor keenaan.

Gurigan la xayiray lama iibin karo, Lama Rahmi karo , waxna lagama badali karo, lama Hibayn karo sifo kalena looma Isticmaali karo Ilaa Amar danbe ka soo baxayo Maxkamadda Gobolka M/Jeex – Hargiesa.

Iyo Wada Shaqayn Wacan

Alle Mahad Leh

((Yaxye Cali Idiris))

Garsoore Maxkamada Gobolka M/Jeex

= Hargaysa =

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

MAXKAMADDA GOBOLKA M/JEEX HARGAYSA

MGH/DFL/193/2014

08/10/2014

Ku: - Taliyaha Saldhiga Booliska Ib/kood/Buur =Hargaysa=

Og: - Idaacada Radyo Hargaysa =Hargaysa=

Og: - Jaraaidka Madax Banaan =Hargaysa=

Og: - Taliyaha Qaybta Booliska ee Galbeedka =Hargaysa=

Og: - Gudoomiyaha Degmada Ib/Kood Buur =Hargeysa=

Og: - Garyaqaanka Guud ee Qaranka J, S, L

=Hargeysa=

Og: - Loofuliyayaal: - Ilma Muuse Cabdule

=Hargeysa=

Aadan Muuse Cabdule

Ismaaciil Muuse Cabdule

Qareen Barkhad Jaamac Are



Og: - Lagufuliyaal; - Dhaxaltooyada Reer Ismaaciil X.Jaamac

Wakiil; - Yuusuf Xuseen Yuusuf

Qareen; - Foosi sh. Yoonis Xasan

Ujeedo: - Amar Xayiraad dhul Cabirkiisu yahay
310X320 Mt kuna yaala Buurta kala jeexan ee
Degmada Ib/Kood/Buur

Maxkamada Gobolka M/Jeex Hargaysa iyada oo Tixraacaysa warqada xayiraad ka qadista ah ee Sumadeedu MGH/DFL/139/2011 ee ku Taariikhaysan 20/6/2013, waxay maxkamadu xayiraysaa dhulka cabirkiisu kor ku xusan yahay, kuna yaala degmeda I/kood-buur, Agagaarka buurta kala-jeexan, jihooyinkiisuna kala yihiin sidan.

1. Bari.....Dayrka Ina Gahayr
2. Galbeed.....Beerta Ilma Muuse Cabdule
3. Waqooyi.....Beerta Ilma Muuse Cabdule
4. Koonfur.....Ilma Biiri Cabdi

Sidaa darted waxay Maxkamada Gobolka M/jeex Hargaysa ku amraysaa Taliyaha Saldhiga Booliska

Ib/Kood/Buur in uu xayiraad saaro dhulkaasi, isla markaana aan la iibin Karin la dhisi Karin, la hibaynm Karin, lana seesi Karin, lana Jeexi Karin, sifo kalena loo isticmaali Karin ilaa amar danbe ka soo baxaayo Maxkamada Gobolka MJeex Hargaysa, Maxkamadu waxay u cuskatay amarkan xayiraada ah Qodobada: - 293, 294, 295, X.H.M Amarkan xayiraada waxa la soo saaray Maanta oo ay bishu tahay 8/10/2014.

(Faysal C/laahi Ismaaciil)

Gudoomiyaha Maxkmada Gobolka M/Jeex Hargaysa

By: - Abshir Rabiile Subagle

Kaaliyaha Fulinta Maxk/Gob M/Jeex Hargaysa

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**
MAXKAMADDA GOBOLKA M/JEEX HARGAYSA

MGH

MGH/DFL/210/2012

15th/October/2014

Ku: Idaacada Radio Hargeisa

=Hargiesaa=

Ku: Wargeysyada Madaxa Banan

=Hargiesaa=

Og: Xafiiska Garyaqaanka Guud Ee Qaranka JSL

=Hargiesaa=

Og: Gudoomiyaha Maxkamada Rafcaanka Gobolka Hargiesaa

Og: Gudoomiyaha Maxkamada Gobolka Hargeisa

=Hargiesaa=

Og: Gudoomiyaha Degmada IB/koodbuur

=Hargiesaa=

Og: Gudoomiyaha Maxkamada Degmada Hargeisa

=Hargiesa=

Og: Loofuliye: Caqiil Yuusuf C/kariim Darwiish

=Hargiesa=

Wakiil u yahay: Xasan Cabdi Nuur

=Hargiesa=

Og: Lagu Fuliye: Muxumed Ismaaciil Xirsi iyo Inamadiisa

=Hargiesa=

Ujeedo: Naado Xaraash Dhul Cabirkiisu dhan yahay
80x60^{Ft} Degmada Ib/Koodbuur

Maxkamada Gobolka M/jeex:

Markay Aragtay: Gal dacwadeedka Madaniga ah ee sumadiisu iyo dhinacyadiisu sare ku xusan yihiin

Markay Aragtay: Xayiraada maxkamada Gobolka M/jeex eek u taariikhaysan 16/09/014

Markay Aragtay: Arjiga ku taariikheysan 24/04/2014 ee soo gudbiyeen xasan Muxumed badal iyo jibriil Muxumed badal oo ah inamada lagu fuliyaha arjigaas oo u jeddadiisu tahay wareejin Balaadhka sare ku xusan si ay uga gashi baxan fulintaas kuna soo wareejiyeen maxkamada Gobolka M/jeex dulkaas sare ku xusan

Markay Aragtay: Qodobada 397, 398, 401 XHM

Sidaa darted waxay maxkamadu Naadinaysaa xaraashka dhulka sare ku xusan

ee ku yaala degmada
Ib/Koodbuur.



Dhulkaas oo cabirkiisu dhan yahay 80x60FT kuna
yaala Degmada Ib/Koodbuur xafada jig jiga yar
jihooyinkiisuna yihiin

Waqooyi..... Dhisme

BariDhisme/ Reer Cumar Xaashi

KoonfurWado

GalbeedDhisme

Oo ka mid ah fayl Numberkan: - Fay No. 15192

Hadaba cidii danaynaysa Naadintaa xaraashkan
waxay kala xidhiidhi karaan xafiiska kaaliyaha sare
ee Maxkamada Gobolka M/Jeex- Hargiesa No: -
4427361 iyo kaaliyaha Maxkamada Gobolka
Hargiesa C/salaam Muuse Ducaale 063-4403220.

Alla Mahad Leh.

((Yaxye Cali Idiris))

Garsoore Maxkmada Gobolka M/jeex

=Hargaysa=

JAMHUURIYADDA SOMALILAND



REPUBLIC OF SOMALILAND

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEISA REGIONAL COURT HARGEISA

MGH



MGH/DFL/120/2014

21/October/2011Ku: I

daacada Radio Hargaysa Hargeysa

Ku: Wargeysyadda Madax Banaan

Og: Xafiiska Garyaqaanka Guud Ee Qaranka Jsl

Og: Gudoomiyaha Maxkama Rafcaanka Gbolka M/Jeex

Og: Gudoomiyaha Maxkamadda Gobolka M/Jeex Hargeysa

Og: Gudoomiyaha Degmadda 26 June

Og: Loo Fuliye: Khadar Aadan Xasan

Og: Lagu Fuliye: 1. C/Raxmaan Xuseen Cumar

2. Aadan Maxamuud Cumar

Ujeedo: Naado Xaraash Guri.

Cabirkiisu Yahay 12x9mt.

Maxkamadda Gobolka M/jeex – Hargaysa-

Markay Aragtay: Gal dacwadeedka fulinta ah ee summaddiisa iyo dhinacyadiisuba sare ku xusan yihiin.

Maraky Aragtay: Codsiga fulinta ah ee ujeedadiisu tahay Codsiga fulinn caddayn ballan qaad bixin lacageed oo

dhan \$ 9884 USD (Sagaal Kun Sideed Booqol Iyo Afar Dollar). Ee Nootaayada Sumaddiisu tahay REF NO XNSHN/34/2013.

Markay Aragtay:

Nootayada summaddiisu tahay REF NO XNSHN/34/2013. Ee ujeedadeedu tahay in lagu fuliye C/raxmaan Xuseen Cumar oo ah damiinul maalka lagu fuliye 1aad. Uu caddaynayo in uu loo fuliyuhu ku leeyahay lacag dhan \$9884 USD (Sagaal Kun Sideed Booqol Iyo Siddeetan Iyo Afar Dollar). Kuna bixinayo muddo shan bilood ah.

Markay Aragtay:


Nootaayada summaddeedu tahay REF XNA 07/2013 ee ujeedadeedu tahay Caddayn waakaalad buuxda ku siinayo lagu fuliyaha labaad ee Aadan Maxamuud Cumar in uuu awood buuxda u leeyahay iibinta guriga iyo in uu jaro qiimaha guriga islamarkaasi ka qaado lacag cida iibasata guriga. Kuna dayn baxo.

Markay Aragtay:

Qaraarka Maxkamadda Gobolka M/jeex – Hargeysa-, ee ujeedadiisu tahay Qaraar muddayn lacageed oo dhan \$ 9884 USD (Sagaal Kun Sideed Booqol Iyo Siddeetan Iyo Afar Doolar). Nuxurkiisuna yahay inn Maxkamadda Gobolka Hargeysa waxay ku amraysaa lagu fuliyaha C/raxmaan Xuseen Cumar uu damiinul maal u yahay AADAN maxamuud Cumar in uu muddo 15 cisho gudahood ah ku bixiyo lacagta dhan \$ 9884 USD (Sagaal Kun Sideed Booqol Iyo Siddeetan Iyo Afar Dollar).

Markay Aragtay:

Qaraarka Maxkamadda Rafcaanka Ee
summadiisu tahay MRGMJ/QMRL/29/2014.
Ee ujeedadiisu tahay in ay Maxkamadda
Rafcaanka Gobolka M/jeex Hargeysa diiday
asbaabta rafcaan ee ay soo gudbiyeen
damiinte Aadan Maxamuud Cmar Iyo la
damiinta C/raxmaan Xuseen Cumar. Sidoo
kalena waxaa ay Maxkamada Rffcaanku
aqbashay jawaabta rafcaansanaha iyo in ay
ayyiday Qaraarka Maxkamadda Gobolka
M/jeex Hargeysa ee summaddiisu tahay
MGH/DFL/120/2014. Waxaa se lacagta lagu
leeyahay oo lagu fulinayaa Aadan Maxamuud
Cumar oo dimiinul maal ahaa.



Markay Aragtay:

Arjiga cadsiga ee uu loo fuliyuhu u soo
gudbiyey Maxkamadda eek u taariikhaysan
20/10/2014. Ee ujeedadiisu tahay in loo
xaraasho guriga sumadiisu tahay File No:
J/AL/J-40/136. Ee jihooyinkiisu kala yihiin:

- Waqooyi: Waddo
- Bari: Waddo.
- Galbeed: Dhisme.
- Koonfur: Dhisme.

Eek u yaala degmadda 26 june xaafadda Almis (Ex
Daruuraha).

Markay Aragtay: Qodobada Sharci Ee Kala Ah
39,398,401 XHM.

Asbaabtaas sare ku xusan iyo qodobada sharci awgeed
waxaaa ay Maxkamaddu naadinaysaa xaraashka guriga
ku yaala degmadda 26 june. Gurigaas oo cabbirkiisu

yahay 12x9mt. lehna File No: J/AL/J-40/136.

Jihooyinkiisuba kala yihiin:

- Waqooyi: Waddo.
- Bari Waddo.
- Galbeed: Dhisme.
- Koonfur: Dhisme.



Kana kooban shan qol, labada daaradood oo dhuudhuban, hal suuli, iyo hal kijoo.

Haddaba, Gurigaas oo uu Mulkiyaasha lehi doonayaan in ay ku dayn baxaan, sidaa darted Maxkamadda Gobolka M/jeex – Hargeysa cidii danaynaysa naadinta xaraashkan waxay kala soo xidhiidhi karaan xafiiska kaaliyaha sare ee maxkamadda Gobolka M/jeex Hargaysa oo nomberkiisu yahay 063-442-736-1 iyo kaaliyaha Maxkamadda Gobolka m/jeex hargaysa Axmed – yaasiin Rashiid Cabdi. 063-444-771-2.

Sidaas Iyo Wada Shaqayn Wacan.

Allaa Mahad leh.

[[Jamaal Axmed Maxamed Cagawayne]]

Garsooraha Maxkamadda Gobolka M/Jeex

-Hargaysa-

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/160/2014

07/10/2014

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khusayso.

Ujeedo:- Diiwaan Gelin TV.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saran diiwaangalinta Saxaafada dalka.

Markuu arkay: - Qodobka 32aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

Markuu arkay: - Qodobka 6aad iyo 7aad ee Xeerka Saxaafadda Xeer Lam.27/2004.

Markuu arkay: - Warqada ogolaanshaha ee Wasaaradda warfaafinta ee sumadeedu tahay WWW/XW/83/09/2014, kuna taariikheysan 25/09/2014 oo ay ku ogolaatay in loo diiwan geliyo TV-ga True Cable Tv.

Markuu Arkay: - Codsiga ay soo qorteen mulkiilayaasha TV-ga kuna codsanayaa in loo diiwan geliyo Tv-gan, kuwaas oo balan qadaaya dhinacooga in ay u hogaansami doonaan Xeerka Saxaafadda Somaliland sida uu qabo qodobadda 10 ilaa 27aad.

Wuxuu Caddeynayaa.

Inuu si Sharci ah uga diiwaan gashan yahay Xafiiskan Tv-ga Magaciisu yahay TRUE CABLE TV, Tv-kaas oo sii deyn doona Ciyaaraha, Aflaamta iyo IWM, xaruntiisuna tahay Magaalada Hargeisa.

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka



JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/162/2014

09/10/2014

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khusayso.

Ujeedo: - Diiwaan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu Arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, MASNO-STAR CONSTRUCTION AND CONTRACTING, oo ay ku Cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu Arkay: - in ay saamiga Shirkaduu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer No.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugin yihiin



Markuu Arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada ku magaceedu yahay, MASNO-STAR CONSTRUCTION AND CONTRACTING, astaanteeduna tahay: - (Guri iyo Xidig) shaqadeedu tahay Dhismaha (Construction and Contracting), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo manta oo ay taarikhdu tahay 09/10/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA



FALILILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/65/2014


11/10/2014

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khusayso.

Ujeeddo: - Caddeyn Diiwaan Gelin Shirkadeed

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka Jamhuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha dalka (Sole Proprietorship).



Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu Arkay: - Ogolaanshaha Wsaaradad Ganacsiga JSL ee WGM-AG-PCA-147/014.

Markuu Arkay: - Xeerka Shirkada ku magacaaban SAREEDO COSMETICS & CRUSET HAIR COLOR LTD

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada ku magaceedu yahay, SAREEDO COSMETICS & CRUSET HAIR COLOR LTD, shaqadeedu tahay soo dejinta Allabta Cosmetics (Import of Cosmetic Products), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo manta oo ay taarikhdu tahay 11/10/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka


JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL



TIX: - XIG/JSL/67/2014

18/10/2014
Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khusayso.

Ujeedo: - Diiwaan Gelin Shirkadeed

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu Arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, PETROLIA STAR SOM COMPANY, oo ay ku Cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu Arkay: - In ay saamiga Shirkaduu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer No.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin

Markuu Arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada ku magaceedu yahay, PETROLIA STAR SOM COMPANY, astaanteeduna tahay: - (Magac shirkada oo la soo gaabiyey PSS) shaqadeedu tahay ka ganacsiga alaabta jumladaha ah (Fuel Importation), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 18/10/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/169/2014

29/10/2014

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khusayso.

Ujeedo: - Diiwaan Gelin Shirkadeed

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu Arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, MIJIR GENERAL TRADING COMPONY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu Arkay: - in ay saamiga Shirkaduu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer No.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin

Markuu Arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada ku magaceedu yahay, MIJIR GENERAL TRADING COMPANY, astaanteeduna tahay: - (Galaas u samaysan sida taajka boqortooyadda) shaqadeedu tahay Soo Dejinta iyo Dhoofinta (Import and Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo manta oo ay taarikhdu tahay 29/10/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL



TIX: - XIG/JSL/168/2014

29/10/2014

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khusayso.

Ujeedo: - Caddeyn Diiwan Galin Shirkadeed

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta shirkadaha dalka (Sole Proprietorship).

Markuu arkay: - Qodobka 11aad ee Xeerka Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer Illaalinta Guud in ay Diiwaan Geliso Shirkadaha.

Markuu Arkay: - Xeerka Shirkada ku magacaaban DUCAALE CONSTRUCTION AND CONTRACTING COMPANY.

Wuxuu Caddeynayaa.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada ku magaceedu yahay, DUCAALE CONSTRUCTION AND CONTRACTING COMPANY, **astaanteeduna tahay:-** (Magaca Shirkada oo la soo qaabiyey DCC) , shaqadeedu tahay Dhismaha (Constraction), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo manta oo ay taarikhdu tahay 29/10/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka



JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/170/2014

29/10/2014

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khusayso.

Ujeedo: - Diiwaan Gelin Shirkadeed

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu Arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, TISQAAD CONSTRUCTION AND CONTRACTING COMPANY, oo ay ku Cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu Arkay: - in ay saamiga Shirkaduu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer No.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin



Markuu Arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, TISQAAD CONSTRUCTION AND CONTRACTING COMPANY, astaanteeduna tahay: - Shan dhisme oo fooqaaq ah oo isku xiga, ka dhexe uu dheer yahay shaqadeedu tahay dhismaha (construction and contracting) xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo manta oo ay taarikhdu tahay 29/10/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka